Baaritaanka afka makaanka- yaree surtaggalnimada ku dhicitaanka kansarka afka makaanka

(warbixin Ingiriis ah: www.sjekkdeg.no)

Dhakhtarkaaga ayaa kuu samaynaaya baaritaanka afka makaanka, laakiin waa inaad adigu balanta ka samaysataa.
Haddii dhowaan baaritaanka lagugu sameeyey, warqaddani kuma khusayso

1

Balan ka samayso dhakhtarkaaga

2



Mar baaritaanka makaanka.

3

Yaree fursadda inuu ku haleelo kansarka ku dhaca afka makaanka.

i

Warbixinta aad u baahantahay oo dhan waxaad ka helaysaa warqaddan ama www.sjekkdeg.no

Waa muhiim in aad marto baaritaanka afka makaanka

Baaritaanka joogtada ah ee afka makaanka, waxaa lagu ogaan karaa isbeddelka ku dhaca unugyadda, intaanay isu beddelin kansarka afka makaanka. Isbeddelka ku dhaca unugyada la mid ma aha kansarka afka makaanka. Islamarkaana inta badan ma laha calaamado lagu garto. Isbeddelka ku dhaca unug-yadda si fudud ayaa loo daawayn karaa. Kala bar dumarka uu ku dhacokansarka afka makaanka waa kuwo marar dhif ah maray, ama waligood aan marin baaritaanka makaanka afkiisa.

Haweenka ay da'doodu u dhaxayso 25 ilaa 69 sano waxaa lagula talinayaa inay si joogto ah u maraan baritaanka afka makaanka. Ujeedadu waa in laga hor tago kansarka ku dhaca afka makaanka kaa soo asiiba haweenka da' kasta jira. Booqo bogga www.sjekkdeg.no si aad u akhrido, khasaaraha iyo faa'iidada ay leedahay inaad marto baaritaanka afka makaanka

Salaan

Ameli Tropé
Hogaamiyaha barnaamijka baaritaanka makaanka

Macaluumad dheeriya ka fiiri xagga dambe warqadan

HPV ayaa sababa kansarka afka makaanka

Isbeddelkka khatarta ah ee ku dhaca unugyada iyo kansarka afka makaanka, waxaa sababa caabuq ama infekshan wakhti dheer jirey, oo uu keenay fayras lagu magacaabo humant papillomavirus (HPV). HPV waa infekshanka sida ugu badan lagu kala qaado galmada.



80 % ragga iyo haweenka galmada sameeya way qaadan fayraska HPV noloshooda wakhti ka mid ah.



90 % HPV fayrasku iskii ayuu ubaxaa 2 sano gudahood.



Lakiin haduu wakhti dheer ku nagaado, wuxuu unugyada ku keeni karaa isbeddel khatara.

Saddex meelood marka looqaybiyo qayb ka mid ahi waxay noqon kartaa kansar, haddii aan la daaweyn.

Sidee u qaadanaysaa baaritaanka afka minka/makaanka?

Baaritaanka/tijaabbada waxaa la qaadaa iyadoo la marayo xubinta taranka, waxuuna qaataa daqiiqado yar. Xanuun ma laha, laakin mararka qaar waxaad dareemi kartaa damqasho iyo dhib yar. Tijaabadii lagaa qaaday waxaa kadib loo dirayaa shaybaarka si looga baaro HPV. Dhakhtarkaaga ayaa helaaya jawaabta qiyaastii bil gudaheed, sida badan. Natiijada baaritaanku haddii aanay caadi ahayn (is badal lagu arko), dhakhtarkaaga ayaa ka masuul ah inuu warbixin ku siiyo kuuna baadhitaanno kale. Haddii natiijada baaritaanku caadi tahay, waxaa lagugula talinayaa inaad baaritaanka marto 3 sano kadib. Barnaamijka baaritaanka afka makaanka ayaa kuu soo diraaya warqadda xasuusinta, markuu soo dhawaado xilligii aad mari lahayd baaritaanka.

Ma jiro baaritaanka afka makaanka oo 100% huubaal ah

Baaritaanka joogtada ahi wuxuu aad u yareeya suurtaggalnimada kansarka ku dhaca afka makaanka, laakiin si kastaba waxaa dhici karta in mararka qaarkood aan la arkin isbedello khatar ah oo ku dhaca unugyadda afka makaanka, sababo kala duwan dartood. Xataa haddii natiijada baaritaankaagu caadi noqotay, waa muhiim inaad dhakhtarka si deg deg ah ula xiriirto haddii aad isku aragto calamadaha ay ka mid yihiin khalkhal joogto ah oo ku yimaada dhiigga caadada ee dumarka, dhiig kaa yimaada galmada kadib, dheecaamo aan caadi ahayn, ama xanuun joogta ah oo kaa haya hoosta.

Baaritaanka afka makaanka waxaad ka qaadanaysaa dhakhtarkaaga joogtada ah

Balan ka samayso dhakhtarkaaga si aad u qaadatid baaritaanka afka makaanka. Dhakhtarka joogtada ah ayaa samaynaya baaritaankan. Haweenka qaarkood way ku adagtahay, in ay baaritaanka noocaan ah ka maraan dhaktarkooda joogtada ah. Haddii aad sidaa dareemaysid kala hadal dhakhtarkaaga sidii kale ee suurtoggal ah. Sida badan wuxuu qofku baaritaanka ka qaadan karaa dhakhtar kale oo isla goobtaas xafiis ku leh. Xaaladaha qaar waxaa dhici karta inaad codsato in laguu diro dhakhtarka haweenka. Waa inaad adigu iska bixisaa qaybta qarashka baaritaanka ee qofku uu bixiyo.

Waa muhiim inaad sii ogaato intaanad baaritaanka marin

Iska ilaali inaad baaritaanka martid adigoo qaba dhiigga caadada. Iska ilaali isticmaalka suufka, nooc kasta oo ah kareemada iyo daawooyinka loo isticmaalo xubinta taranka, maalin kahor baaritaanka, waayo waxay sababi kartaa natiijada baaritaanka oo khalad noqota.

Xaqa diidmada iyo ilaalinta xogta qofka

Diiwaanka Kansarku wuxu kaydinayaa natiijada baaritaanka lagugu sameeyey. Waad diidi kartaa in natiijada caadiga noqotay lagu kaydiyo Diiwaanka Kansarka. Waxaad xaq u leedahay inaad diido in Diiwaanka Kansarku uu qaybo ka mid ah xogta baaritaannadaada la wadaago shaqaalaha caafimaadka ee soo codsada marka ay xaaladaada la soconayaan. Waxaad codsan kartaa inaad aragtid ama (ogaatid) xogta kugu saabsan ee laga diiwaangeliyey Diiwaanka Kansarka.

Waxaad warbixin dheeraad ah ka helaysaa bartayada internetka https://www.kreftregisteret.no/livmorhals

La xiriir dhakhtarkaaga ama anaga hadii aad su, aalo ka qabto baaritaankii makaanka ee, lagugu sameyey.

Nagala soo xiriir telefonka 22 45 13 00

Maalin kasta laga bilaabo 12 ilaa 14.30 ama email-livmorhals@kreftregisteret.no

Fight HPV

Ma xiisaysaa inaad ciyaarto?

Soo dejiso appkaan oo kabaro macluumad dheerada oo ku saasaabsan HPV.



Livmorhals programmet

#SJEKKDEG

Kreft registeret